

Baaristeena Ilmaha Hadda Dhashay



Macluumaadka muhiim u ah **Baarista Ilmaha
Hadda Dhashay** oo loogu talagalay waalidiinta
Gobalka Washington



www.doh.wa.gov/NBS

DOH 304-007 July 2020 Somali



Newborn Screening Program

Newborn Screening Program (Barnaamijka Baarista Ilmaha Hadda Dhasha) waxaa lagu sameeyaa Shaybaarada Washington State Public Health Laboratories (Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ee Gobalka Washington) oo kuyaala Shoreline, Washington. Sanad kasta, barnaamijka ayaa lagu baaraa 175.000 oo kasbooyin dhiig ah si gacan looga gaysto helida xaaladaha xanuunada daran xili hore loona siiyo dhalaanka Washington nolol biloow caafimaad leh.



Hanbbalyos

dhalashada cunugaaga!

Intaad lajaanqaadayso nolosha cusub ee ilmahaaga, waxaa jiro waxyaabo badan oo aad kabaaraan dagayso. Baaritaanka ilmaha hadda dhashay waa mid kamid ah waxyaabaha muhiimka ah ee aad kuxaqiijin karto in cunugaagu uu nolol caafimaad leh u bilaabo sida ugu macquulsan.

Waa maxay Baaritaanka Dhalaanka?

Barnaamijka Baaritaanka dhalaanka wuxuu kahortagi karaa dhibaatooyin caafimaad oo aad udaran ama xataa wuxuu badbaadin karaa nolosha cunugaaga. Baaritaanka dhalaanka wuxuu gacan kagaystaa aqoonsiga tiro kamid ah dhibaatooyin caafimaad oo daran aadna ukooban isla marka uu ilmuhu dhasho. Adoo macluumaadkaan gacanta kuhaya, waalidiinta iyo dhakhaatiirta ayaa bilaabi kara daawayn kasta oo loobaahanyahay kahor intaan halista xanuunku imaan.



1 kamid ah 480 kasta oo ilmaha markaas dhasha ayaa qaba xaalado caafimaad oo xun kana faaiidaysta baaritaanada hore iyo daawaynta waxaana mahadeeda iskaleh barnaamijka baaritaanka dhalaanka.





Sidee loosameeyaa Baaritaanka Dhalaanka?

Dhakhtar caafimaad ayaa dhawr dhibcood oo dhiig ah kaqaadaaya ciribta cunugaaga kuna shubaaya xaanshi qaas ah, taasoo loo yaqaano kaarka baaritaanka dhalaanka. Kani waa nidaam baaritaan oo badqab leh joogtana ah kaasoo lagu samayn karo isbitaalka, xarun caafimaad, shaybaar, xarunta dhalmada, ama guriga oo ay kusamayn karto umulisadu. Marka dhiigu qalalo, waxaa kaarka loodirayaa Newborn Screening Program oo lagu sameeyo Washington State Public Health Laboratories si loogu baaro.

Maxay tahay sababta loogu baahanyahay baaritaanka Dhalaanka?

Caruurta umuudda kuwo caafimaad qaba markay dhashaan kanasoo jeeda qoysas caafimaad qaba ayaa wali qabi kara xaalado caafimaad oo daran. Baaritaanka dhalaanka ayaa aqoonsanaaya xanuunadan gacana kagaysanaaya xaqiijinta in caruurta helaan daawada ay ubaahanyihiin islamarkaba si ay u koraan ayagoo caafimaad buuxa qaba. Haddii xanuunadaan aan la ogaan xili hore, waxay keeni karaan xaalado caafimaad oo dhimasho keeni kara inta cunugu koraayo.



Dhamaan dhalaanka reer Washington waa labaaray

Baaritaanka dhalaanku waa qaabka ugu dhaqsiyaha badan ee lagu aqoonsanaayo xaaladahaas caafimaad kahor inta aan ilmuhu xanuunsan. Si loo xaqiijiyo in dhalaanka hadda dhashay ee reer Washington ay yihiin kuwo caafimaad qaba, sharciga gobalka ayaa dhigaaya in dhamaan dhalaanka kudhasha gobalka labaaroo kahor intaysan labo maalin gaarin da'ahaan. Tani waxay usahlaysaa ilmaha inuu helo baaritaanka uu ubaahanyahay sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah.

Dhalaanka waa in labaaraa labo jeer.



Kasbada **koowaad** ee dhiiga yar ayaa laga qaadaa ilmaha islamarkaba markuu ilmuhu dhasho, marka cunugaagu gaaro hal ilaa labo maalmood. **Baaritaankaan wuxuu muhiim u yahay baarista noocyada daran ee xanuunadaan.**



Kasbada **labaad** ayaa cadiyan laqaadaa booqashada caadiga ah ee ilmaha caafimaadka qaba isbitaalka kuyimaado, marka cunugaagu gaaro da'da hal ilaa labo asbuuc. **Baaritaankaan waxaa lagu baarayaa xaaladaha caafimaad ee aan labaari karin baaritaankii koowaad ee dhalashada kadib.**





Sidee Ayaan ku Ogaanayaa Natiijoyinka Baaritaanka Cunugayga?

Waydii daryeel bixiyaha cunugaaga natiijooyinka baaritaanka ilmaha. Isbitaalka, xarunta caafimaadka, shaybaarka, ama umulisada soogudbisay baaritaanka cunugaaga ayaa loosoo gudbinayaa natiijada baaritaanka muddo hal asbuuc ah gudaheed. Newborn Screening Program yaa laxariiraaya daryeelaha caafimaadka ee cunugaaga xili hore haday jirto xaalado caafimaad.

Maxay natiijooyinka baaritaanka Dhalaanka iisheegayaan?

Inta badan baaritaanada dhalaanka lagu sameeyo waa kuwo caadi ah. Natiijo **caadi ah, mid xanuun muujinaysa**, ama **iskuujir ah** waxay kaliya muujinaysaa in cunugaagu qabi karo mid kamid ah xanuunada laga baaray. Baaritaano dheeraad ah ayaa loobahanayaa si loogaaro go'aan kama danbays ah. Newborn Screening Program yaa kaala shaqaynaaya adigga, daryeelaha caafimaad ee cunugaaga, iyo dhakhaatiirta taqasuska uleh daawaynta xanuunadaan si looxaqiijyo in cunugaagu helo daryeelka ugu haboon.

Baaritaanada barnaamijka baaritaanka dhalaanka waa kuwo aad usaxan, laakiin majiro baaritaan noqon kara boqolkiiba boqol. Haddii cunugaagu umuuqdo mid xanuunsan ama aad su'aalo kaqabto natiijooyinka kasoo baxa newborn screenin, fadlan laxariir daryeel bixiyaha caafimaadka ee cunugaaga.

Sidee ayaa Xanuunadaan Loo daaweeyaa?

Xanuun kasta waa kaduwan yahay kan kale. Xanuunada qaarkood waxaa lagu daaweeyaa cuntooyin gaar ah qaarkoodna waxaa lagu daaweeyaa daawoyin ama adeegyo kale oo caafimaad leh, sida daawaynta jirka ama qaliin. Daawada ilmaha lasiiyo xili hore noloshiisa waxay usahlaysaa ilmaha inuu helo fursad ugu fiican ee uu kuhelaayo kobac iyo hormar caafimaad qaba.



..... ○

Waa meeqa Qarashka Baaritaanku?

Waxaa jiro qarash halmar lagaa qaadaayo kasoo lagu daboolaaayo baaritaanka uu sameeyo Gobalka Washington. Caadiyan, qarashkaan wuxuu lasocdaa qarashka dhalinta ama qarashka dhalmada ee isbitaalka lagaaga qaado. Hase yeeshee, xarumaha caafimaadka qaarkood ayaa lacag dheeraad ah kaaga qaadi kara qaadista dhiiga. Qarashaadkaan waxaa inta badan kaabixinaaya caymiska.


Booqo webseetka Newborn Screening Program si aad uga hesho wixii macluumaad dheeri ah oo ugu danbeeyay:

doh.wa.gov/NBS/ScreeningCost

Maxaa Lagu samaynayaa Tijaabooyinka Dhiiga?

Sida kucad sharciga gobalka, kaararka baaritaanka dhalaanka waxaa lagu haynayaa meel amaan ah muddo 21 sano ah kadibna waa la iskatuurayaa. Shaybaarka ayaa u adeegsan kara tijaabooyinka dhiiga si uu kor ugu qaado baaritaanka dhalaanka. Majiraan macluumaad la aqoonsan karo oo loo adeegsanaayo baaritaanka ayadoon fasax qoraal ah laga qaadan waalidka ama masuulka ilmaha. Waxaad codsan kartaa in tijaabada dhiiga laga qaaday cunugaaga labaabi'iyo xiligaad doonto kadib marka baaritaanka dhalaanku dhamaado.

Booqo webseetka Newborn Screening Program si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan xeerarka arimaha sirta ah: doh.wa.gov/NBS/PrivacyPolicies



Maan diidi karaa in cunugayga lamarsiiyo Baaritaanka Dhalaanka?

Sabab laxariirta muhiimada ay leedahay in laga hortago saamaynada xun xun ee xanunadaan, waalidiinta ayaa kaliya diidi kara baaritaanka dhalaanka ee cunugooda haday kahor imaanayso caqidooyinkooda diinta ama cibaadadooda. Si aad u diido baaritaanka dhalaanka sababahaan awgood, waalidka ama masuulku waa inuu saxiixaa qaybta diidmada ee kutaala dhabarka danbe ee kaarka baaritaanka uuna udiraa Newborn Screening Program ee Washington State Public Health Laboratories.



Waa maxay Xanuunada Baaritaanka Dhalaanka Lagu ogaado?

Baaritaanka dhalaanka ayaa gacan kagaysta aqoonsiga xanuunada soosocda.

Waxaad macluumaad dheeraad ah kaheli kartaa doh.wa.gov/NBS/disorders

Xanuunada Amino Acid ta

1 KAMID 10,000 EE ILMOOD OO DHASHA AYUU KUDHACAA

Xanuunadaan waxay saameen kuyeeshaan awooda jirka ee adeegsiga qaybo kamid ah cuntada oo looyaqaano amino acids si jirku ukoro tamarna uyeesho. Tani waxay keentaa in walxuhu ku abuurmaan jirka ayna si daran usaameeyaan caafimaadka, kobaca, iyo waxbarashada, waxayna mararka qaar keeni karaan dhimasho.

- Argininosuccinic acidemia (ASA)
- Citrullinemia (CIT)
- Homocystinuria (HCY)
- Xanuunka Kaadidada ee Maple syrup (MSUD)
- Phenylketonuria (PKU)
- Tyrosinemia type I (TYR-I)

Xanuunada Qalajiyaasha Ashitada Dufanka

1 KAMID 11,000 EE ILMOOD OO DHASHA AYUU KUDHACAA

Dhalaanka qaba xanuunka qalajiyaasha ashitada dufanka ma adeegsan karaan dufanka jirkooda kujira tamar ahaan. Arintaan ayaa keeni karta waxyeelo ba'an oo kudhacda wadnaha, beerka, iyo xubnaha kale ee jirka. Haddii aan ladaawayn, xanuunkaan wuxuu keenayaa dhibaatooyin daran oo caafimaad iyo mararka qaar dhimasho.

- Carnitine uptake deficiency (CUD)
- Long-chain L-3-hydroxy acyl-CoA dehydrogenase (LCHAD) deficiency (Xanuunka dheecaanka yareeya)
- Medium-chain acyl-CoA dehydrogenase (MCAD) deficiency
- Trifunctional protein (TFP) deficiency (Xanuunka dhanka barootiinka)
- Very-long chain acyl-CoA dehydrogenase (VLCAD) deficiency

Xanuunada Organic Acid ta

1 KAMID 29,000 EE ILMOOD OO DHASHA AYUU KUDHACAA

Dhalaanka qaba xanuunada aashitada dabiiciga ah maruugi karaan qaybo kamid ah barootiinada cuntada kujira. Walxaha ayaa jirkooda ku ururaaya kadibna saamayn ba'an kureebaaya caafimaadka, kobaca, iyo waxbarashada, sidoo kalana keeni kara dhimasho.

- 3-hydroxy-3-methylglutaric aciduria (HMG)
- Beta-ketothiolase deficiency (BKT)
- Glutaric acidemia nooca I (GA-1)
- Isovaleric acidemia (IVA)
- Methylmalonic acidemias (Cbl A, B iyo MUT)
- Multiple carboxylase deficiency (MCD)
- Propionic Acidemia (PROP)

Lysosomal Storage Disorders (Xanuunada Kaydka ee maadada Lysosomal)

1 KAMID AH 32,000 ILMAHA DHASHA AYUU KUDHACAA

Ilmaha qaba xanuunada lysosomal ma awoodaan inay dheefshiidkoodu shiido sonkorta iyo dufanka cuntada kujira. Tani waxay keeni kartaa in maadooyin sun ah ay kabuuxsamaan jirka taasoo keeni karta dhibaatooyin kuhabsada maskaxda, lafaha, murqaha, ama wadnaha cunuga.

- Mucopolysaccharidosis nooca I (MPS-I)
- Glycogen storage disease nooca II (Pompe)

Naafada Garaadka

Congenital hypothyroidism (CH)

1 KAMID AH 950 ILMAHA DHASHA AYUU KUDHACAA

Ilmaha qaba xanuunada congenital hypothyroidism masoo saaraan hoormoonada thyroid oo kufilan si ay kobac iyo kornimo oo caafimaad qaba uhelaan. Haddii aan ladaawayn xanuunkaan, wuxuu keeni karaa naafonimo dhanka caqliga ah iyo dhibaatooyin dhanka kobaca ah.

Congenital adrenal hyperplasia (CAH)

1 KAMID AH 14,000 ILMAHA DHASHA AYUU KUDHACAA

Ilmaha qaba xanunka congenital adrenal hyperplasia masoosaari karaan hoormoonada loobaahanyahay si jirku shaqa caafimaad leh uqabto. Ilmahaan waxay mari karaan noocyo haraad iyo koomo dhimasho keeni kara. Ilmaha dhadiga ah waxay yeelan karaan xubin taran oo nooc kale ah.

Xanuunada Kale

Sickle cell iyo Hemoglobinopathies (HGB)

1 KAMID AH 4,700 ILMAHA DHASHA AYUU KUDHACAA

Dhalaanada kudhasha xanuunka sickle cell ama xanuunada kale ee hemoglobinopathies ka ah ayaa qaba unugyada dhiiga cas oo aan saxnayn. Unugyada dhiigu ma awoodaan inay xanbaaraan oxygen si kufilan intay marayaan jirka oo dhan. Xanuunadaan waxay keeni karaa caabuqyo joogto ah, xanuun daran, dhiig la'aan, iyo dhibaatooyin kale.

Cystic fibrosis (CF)

1 KAMID AH 5,500 ILMAHA DHASHA AYUU KUDHACAA

Dhalaanka qaba xanuunka cystic fibrosis waxay leeyihiin sanbabooyin daciif ah waxayna dhibaato kuqabaan nafaqodaro. Tani waxay keeni kartaa dhibaatooyin caafimaad iyo nololsha oo sookoobanta.

Biotinidase deficiency (BIO)

1 KAMID AH 86,000 ILMAHA DHASHA AYUU KUDHACAA

Dhalaanka qaba xanuunka biotinidase deficiency jirkoodu ma isticmaali karo feetamiinka muhiimka ah oo looyaqaano biotin. Haddii aan ladaawayn, xanuunkaan wuxuu keeni karaa faruurac, dhago la'aan, qalal iyo dib dhac dhanka kobaca ah.



Galactosemia (GALT)

**1 KAMID AH 11,000
ILMAHA DHASHA AYUU
KUDHACAA**

Dhalaanka qaba xanuunka galactosemia ma calalin karaan maadada galactose, oo ah sonkor caanaha kujirta. Marka dhalaanku cabaan caano, ayna kujiraan caanaha naaska, galactose ayaa kabuuxsanta jirka waxayna keeni kartaa indho la'aan, maskax faluuq, ama dhimasho.

**Severe combined
immunodeficiency (SCID,
Xanuunada Iskudhafan
ee difaaca jirka daciifiya)**

**1 KAMID AH 88,000
ILMAHA DHASHA AYUU
KUDHACAA**

Dhalaanka qaba xanuunka evere combined immunodeficiency waxay dhashaan ayagoon lahayn nidaamka difaca jirka. Jirkoodu lama dagaali karo jeermiska sababa xanuunka iyo xataa inta badan caabuqyada caadiga ah ayaa dili kara ilmaha.

Xanuunka Daciifiya Murqaha (SMA)

**1 KAMID AH 15,000
ILMAHA DHASHA AYUU
KUDHACAA**

Ilmaha qaba SMA waxay lumiyaan dhaqdhaqaaqa unugyada neerfaha ee araxdooda. Marka aysan unugyadaan fariimo u diri karin murqaha, masii shaqayn karaan. SMA ayaa noqon kara mid fudud ama daran. Haddaan la daawayn, SMA wuxuu sababi karaa kobac la'aanta dhaqdhaqaaqa, dhibaato dhanka neefsiga ah ama wax cunista, ama xataa dhimasho.

X-linked adrenoleukodystrophy (X-ALD)

**1 KAMID AH 17,000
ILMAHA DHASHA AYUU
KUDHACAA**

Dhalaanka qaba X-ALD jirkoodu mashiidi karo dufanka qaarkiis oo jirka kudhexjira. Waxay kabuuxsamaan jirka waxayna keenaan waxyeelo daran oo dhanka neerfaha ah, taasoo sababta dhibatooyinka dhanka waxbarashada, daciifinta murqaha, koomada iyo xataa dhimasho. X-ALD waxay badanaa kudhacaan labka, laakiin dhadiga ayaa qabi kara astaamo markay waynaadaan kuna gudbin kara X-ALD ilmahooda.



Baaritaanka dhalaanka ayaa badbaadiyay noloshayda.

“Markaan dhashay aaladaan ayaa iga heshay xanuunka congenital metabolic oo looyaqaano hypothyroidism. Waxaan dhashay anoon lahayn maadooyinka labo jibaarma xaaladan aan caadiga ahayn oo ahaan lahayd masiibo dhanka kobaca iyo koriimada ah hadaan layga baari lahayn laygana daawayn lahayn saacado kadib markaan dhashay. Haddii aanan mari lahayn baaritaanka dhalaanka waligay uma koreen ilaa aan sidaan maanta ahay udheeraado, waligay kuleej ma aadeen, umana tartameen kulan ciyaareed. Waxaan kudhiirigalinayaa qoys kasta inay kafaiidaystaan baaritaanka, waqtiga saxda ah, oo lagu badbaadinaayo nolosha waxaana umahadcelinayaa shaqaalaha cajiibka ah ee kashaqeeya isbitaalka iyo shaybaarada Caafimaadka Dadwaynaha oo ayagu fuliya baaritaanka dhalaanka. Waligay waxaan lib iyo abaal uhaynayaa shaqada ay shaqalahaan qabtaan.”

—Aidan, oo laga helay xanuunka congenital hypothyroidism kaasoo looga qaaday Baaritaanka Dhalaanka ee Gobalka Washington sanadkii 1998






Liiska Baaritaanka Dhalaanka

- Xaqiiji in kasbada dhiiga ee baaritaanka dhalaanka laga qaado cunugaaga dhalashada kadib.
- Xaqiiji in isbitalkaaga ama umulisadu ay haysato taleefanka nambarka saxda ah iyo ciwaanka lagaa heli karo.
- Dooro daryeel bixiye caafimaad oo cunugaaga aryeelka dhalaanka una sheeg maclumaadkiisa isbitaalka ama umulisada.
- Keen cunugaaga markuu gaaro hal ilaa labo asbuuc jir si loomarsiyo baaritaanka ilmaha caafimaadka qaba loona marsiiyo baaritaanka labaad ee baaritaanka dhalaanka.
- Waydi daryeel bixiyaha caafimaadka ee cunugaaga natiijoyinka baaritaanka dhalaanka.
- Raac wixii tilmaamo ah oo ku aadan baaritaano kale, balamo, ama daryeel dabagal ah.

Baaritaano kale Ayaa Lamarsiin karaa Cunugaaga

Waxaa jiro xaalado kale oo caafimaad kuwaasoo keeni kara in cunugaaga labaar, sida xanuunada daran ee wadnaha iyo dhago la'aanta. Si aad uhesho macluumaad dheeraad ah oo ku aadan baaritaanka ciladaha dhanka wadnaha, laxariir adeeg bixiyahaaga caafimaadka, si aad uhesho macluumaadka baaritaanka maqalka, booqo doh.wa.gov/earlyhearingloss.





Newborn Screening Program
P.O. Box 55729
1610 NE 150th Street
Shoreline, WA 98155-0729

Taleefanka: (206) 418-5410
Laynka Bilaashka ah: (866) 660-9050
Fax: (206) 363-1610
Emailka: NBS.Prog@doh.wa.gov
Webseetka: www.doh.wa.gov/NBS

Waxaa laga heli kara webseetkeena ayago kuqoran luuqadahaan:
አማርኛ – Amharic | العربية – Arabic – Carabi | 中文 – Chinese – Shiinees |
日本語 – Japanese – Japaniis | ភ្នំពេញ – Cambodian (Khmer) |
한국어 – Korean – Kuuriyaan | ਪੰਜਾਬੀ – Punjabi | Русский – Russian |
Af-soomaali – Somali | Español – Spanish – Isbaanish |
Tagalog – Tagalog | Українська – Ukrainian | Tiếng Việt – Vietnamese

Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-525-0127.
Haddii aad tahay macaamiil dhagool ah ama aad maqal culus
tahay, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl udir
Civil.rights@doh.wa.gov.

Shaqadaan waxaa taageeray Association of Public Health Laboratories (Ururka Shaybaarada
Caafimaadka Dadwaynaha) ayagoo usoo maraaya Health Resources and Services Administration
(HRSA, Waxaha Caafimaadka iyo Adeegyada Maamulka) of the U.S. Department of Health and Human
Services (HHS, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada ee U.S) oo leh deeqda nambarkoodu
yahay # UG9MC30369 New Disorders Implementation Project (Mashruuca Dhaqangalinta Baaritaanka
Xanunada Cusub) oo qarashkiisu dhanyahay \$4,000,000. Macluumaadkaan ama mawduucaan iyo
gabagabadaan waxaa iskaleh qoraaga lamana qaadan karo wax kamid ah xeerka guud, kamana
haysan karaan dhiirrigalin kutimid faragalinta HRSA, HHS ama Dawlada Maraykanka.